NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Iskaanka Computed Tomography (CT, Sawirka laga qaado jirka ee la adeegsado shoocaaca)

## Computed Tomography (CT) Scan (Somali)

Iskaanka Computed Tomography (CT, Raajada Kumbuyuutarka lagu eego) waa nooc raajooyinka kamid ah oo sawiro ka qaada jirka canugaaga. Waxaa loo isticmaali karaa dhammaan qeybaha jirka, oo ay ku jiraan gacmaha iyo lugaha, xubnaha jirka, xididada dhiiga iyo lafaha. Iskaanka CT waxaa loo qaadaa si degdeg ah, xanuuna ma leh, mana soo laabto wuxuuna sheegaa natiijo sax ah. Wareeg walba oo uu mashiinku sameeyo, wuxuu cunugaaga ka qaadaa sawir khafiif ah. Sawiradaan waxay la mid yihiin jeex rooti ah. Dib ayaa loogu diyaarin karaa si loogu eego aagaga qarsoon oo kaladuwan oo xattaa waxaa lagu qaadi karaa sawirada 3-D.

**BALANTA:**

Taariikhda: ______________________

Waqtiga Baaritaanka: _____________

Fadlan ku soo wargeli **Waaxda Raajada. Xafiiska Diiwaangelinta**, oo ka imaanayo Magic Forest, dabaqa koowaad ee dhismaha Isbitaalka cusub ee Isbitaalka Nationwide Children's.

Waalidka ama masuulka sharciga ah waa inuu joogaa diiwaan gelinta illaa inta canugaagu ka gaaraayo 18 sanno jir ama kasii wayn.

❑ Fadlan imoow 15 daqiiqo kahor xiliga baaritaanka si aad u hesho wakhti lagugu diiwaan gasho.

❑ Fadlan imoow 2 saac iyo 15 daqiiqo ka hor saacada baaritaanka si aad waqti ugu hesho isdiiwaangelinta iyo daawada baaritaanka kahor la cabo ee khafiifisa uur kujirta.

Haddii aad u baahan tahay inaad joojiso ballantaada ama aad dib u dhigto, wac (614) 722-2000.

### Baaritaanka kahor


- **Hubi inaad farsamo-yaqaanka u sheegto haddii ay suurtagal tahay in adiga ama ilmahaagu uur leedihiin.**
- Fadlan iskaanka kala hadal ilmahaaga kahor baadhitaanka si uu u fahmo waxa uu farsamo-yaqaanku sameyn doono. Farsamo yaqaanka wuxuu sidoo kale kuu sharaxayaa wax walba kahor baaritaanka. Xoriyad dareen aad ku weydiisid su'aalo kahor, inta lagu jiro iyo kadib iskaanka.


©1978, Waxaa dib loo eegay 2021, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- Haddii aadan uur laheyn oo aanan kula joogin carruur kale, waxaa lagugu soo dhaweynayaa inaad la joogto canugaaga inta lagu jiro baaritaanka oo dhan.
- Baaritaanada qaarkood waxaa bukaanka laga doonayaa inuu cabo daawada caloosha khafiifka ka dhigta. Kani waa cabitaan canugaagu cabaayo oo fududeynaaya in iskaanku si fiican u arko miskaha iyo calooasha cunugaaga. Haddii lagu weydiiyo inaad timaado 2 saac iyo 15 daqiiqo kahor, canugaaga waxaa loo balamiyay inuu cabo daawada baaritaanka kahor la cabo ee khafiifisa uur kujirta. Daawada bukaanka afka laga siiyo waxaa caadiyan lagu qasaa Crystal Lite® iyo dhadhan sidaas oo kale ah.
- Halkii uu ka cabi lahaa, cunugaaga waxaa laga yabaa in la siiyo **daawada khafiifiya caloosha** ayadoo la adeegsanaayo cabir yar oo lagu duraayo xididka (ama fiilada faleenbaha IV). Ilmahaagu waxa uu marka hore dareemi doonaa wax yar oo ah sida in wax lagu muday, laakiin wuxuu dareemayaa dhowr sikin oo kaliya.
- **Daawada khafiifisa uur kujirta** waxay ku wareegataa dhiiga waxayna qaybo ka tirsan jidhka ilmahaaga si cad ugu muujisaa raajitada.

## Sida baaritaanka loo sameeyo

- Si loo sameeyo baadhitaanka, ilmahaaga waxa la saari doonaa miis jilicsan. Suuman, sida suumanka baabuurka, ayaa lagu qaban doonaa jidhka ilmahaaga waxaana lagu xidhi doonaa miiska. Arrintaan waxaa loogu talagalay in cunugaaga looga ilaaliyo inuu sameeyo dhaqdhaqaaq ama uu dhaco.
- Haddii canugaaga uu maraayo iskaanka CT ee madaxa iyo qoorta, wax kasta oo madaxa ugu jira (sida qabatooyinka timaha ee macdan ah, koofiyad, muraayad ama timo artifishal ah) waa laga saari doonaa. Suunka waxaa looga xiri doonaa qaybta kore ee wajiga waxana dhegaha loo gelin doonaa suuf jilicsan si uusan madaxa u dhaqdhaqaajin inta baaritaanku socdo.



**Sawirka 1** Baaritaanka iskaanka CT.

- **Haddii canugaaga uu marayo iskaanka CT-ga ee xabadka, xundhurta ama miskaha, gacmahiisa/ gacmaheeda waxaa lagu qaban doonaa korka madaxiisa si aan meelaha la sawiraayo loogu darin. Waxa dhici karta in lagu weydiisto inaad qabato gacmaha cunugaaga inta uu iskaanku socdo.**
- **Farsamo-yaqaanku waxa uu dhaqaajin doonaa miiska si qaybta la sawiraayo ay ugu jirto daloolka mishiinka CT (Sawirka 1).** Farsamo-yaqaanku waxa uu gali doonaa qol kale si uu u bilaabo mashiinka CT.

- Farsamo-yaqaanku wuxuu joogi doonaa qol kale si uu mashiinka u hawlgeliyo. Waxay awoodi doonaan inay cunugaaga ka dhex arkaan daaqada ayna kala hadlaan sameecada codka ee mashiinka. Ilmahaagu waxa uu maqli doonaa shanqar guux ah marka mashiinka CT-gu daarmo. Mashiinka CT waxa uu ku dul dhaqdhaqaaqayaa qaybta jidhka ee iskaanka lagu sameynaayo waxa uuna sameeyaa shanqadh guux ah. Inta uu sameynaayo dhaqdhaqaaqa, iskaanku wuxuu soo diraa sawirada shoocaaca baaraaasha ayaana soo qaada sawirada shoocaaca ee uu sameeyay iskaanku. Kuwaas ayaa la cabiraa waxaana lagu uruuriyaa xusuusta kumbiyuutar. Kumbiyuutarku wuxuu sawir ka qaadaa qaybaha jirka.
- Canugaaga waa inuu toosan yahay illaa sawirada laga qaadaayo. Farsamo-yaqaanku waxa uu la socon doonaa shaashadda si uu u fiiriyo in sawiradu si sax u qaadmayaan.
- Kadib baaritaanka, farsamo yaqaanku wuxuu ku siin doonaa tilmaamo gaar ah oo la xariira daryeelka cunugaaga ee guriga.

## Balamaha Dabagalka ah

Warbixinta iskaanka CT waxa loo diri doonaa dhakhtarka ilmahaaga 48 saacadood gudahood kadib marka baaritaanka la sameeyo. Dhakhtarka ayaa sharixi doona natiijooyinka baadhitaanka iyo qorshaha daryeelka caafimaadka. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, haka meermeerin inaad weydiiso dhakhtarka cunugaaga, ama wac Waaxda Raajitada ee Nationwide Children’s Hospital adoo ka wacaaya (614) 722-2645.